

XIDHMADA ILLAHA WAALIDKA

April 2006

	Tusmada	Bog
1	Gargaarka (benefits) iyo Xuquuqda Gargaarka Xuquuqda Umusha Dhaqaalaha iyo Daymaha	3-5
2	Waajibaadka iyo daryeelka ilmaha Diiwaangalinta dhalashada ilmahaaga Ilmahaaga oo aad kaligii ka tagtid Daryeelka sii-haynta ilmaha Amaanka Dulmiga ilmaha Badbaadinta Ilmaha (Ma ka walwalsan tahay ilmo?)	5-7
3	Waxbarasho Dugsi-dhigasho Cabsi-galin	8-9
4	Caafimaadka Maandooriyeyaasha lagu wafdo Khamri Ambalaas / 999 Dhakhtarka ilkaha Qorsheynta Qoyska iyo Caafimaadka Galmada Goynta Cawrada Hablaha GP iyo Adeegyada Umusha HIV+ iyo AYDHIS Caafimaadka Maskaxda Caafimaadka Maskaxda: Diiqadda Ka-dib Umusha Dhicinta Farmasiyada Uurka iyo Dhalidda Ilmaha Sigaar-cabista Uurka Tobaneeyo-jirka iyo Caafimaadka Galmada Xarumaha Bilaa Ballanta ah (Walk-in) iyo Xarumaha Daweynta Dhaawacyada Fudud	9-15
5	Kooxaha Taageerada Khadadka Gargaarka ee Taageerada Niyadda Budhcadnimada Guriga Dhibista Sinjiga ku Saleysan Kufsiga iyo Farosaar Galmo Galmada	16-17
6	Taageerada Qoysaska Wacnaanta Niyaddaada Wacnaanta Niyadda: Adiga iyo Wehelkaaga Sida Kali Loo Maareeyo Taageerada Qoysaska	17-19
7	Xidhiidhyo Faa'iido Leh	19-31

Gargaarka

	<p>Gargaarka Waxa jira tiro ah gargaar laga yaabo inaad xaq u leedahay ama kuu banaan mudada uurka iyo ka umusha. Xeerarka u-banaanaantu waxay noqon karaan kuwo adag waxana ay isbeddeli karaan marar badan sidaa daraadeed waxa ugu fiican inaad talada khabiir ee ugu dambeysay ka heshid hay'adaha hoose.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Xusuuso, waxa laga yaabaa inay kuu banaan yihiin dhamaan gargaarka hoos ku taxan. o Sida loo ogaado gargaarka kuu banaan: xafiiska Sugidda Bulshada (Social Security) ee degmadaada, NASS ama Citizens Advice Bureau (Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta) ayaa awoodi doona inuu kaala taliyo arrimo tiro badan, oo uu ku jiro gargaarku (benefits).
Gargaar	<p>National Association of Citizens Advice Bureaux (NACAB) Golaha Degmada (Local Council) Xafiiska Sugidda Bulshada ee degmada (Social Security) NASS Inland Revenue Child Support Agency (CSA) Ha'yada La-talinta ee degmada</p>

Gargaarkaaga waxa ku jiri kara:

	Waa maxay?	Ayaa bixinaya? War dheeraad ah
Maternity Allowance (Gunnada Umusha)	(Waxa loogu talagalay haweenka aanuu u banaanayn SMP (Statutory Maternity Pay))	Waa hay'adda gargaarka (Benefits Agency) ee degmadaada
Statutory Maternity (SMP) (Mushaharka Umusha ee Sharciga ah)	Waa lacag la siiyo hooyooyinka inta lagu jiro fasaxa umusha, ee shaqeysta lacag ka badan qadar go'an. Si aad u heshid SMP, waa inaad shaqo-bixiyeyaasha siisid ogeysiis sax ah oo ku saabsan uurkaaga.	Waa shaqo-bixiyeyaaga.
Sure Start Maternity Payment (SSMG)	Waa lacag-siin hal mar ah oo loogu talagalay in qoysaska dhaqaalahoodu hooseeyo laga gargaaro inay maareeyaan kharashka dheeraadka ah ee ka imanaya ilmaha dhashay	www.surestart.gov.uk/aboutsurestart/parents/parentsinfo/
Statutory Adoption Pay (Lacagta Qaadashada Ilmo ee Sharciga ah)	Waa lacag ay shaqo-bixiyeyaashu siiyaan dadka ilmo u qaadanaya si ay u korsadaan.	Shaqo-bixiyahaaga
Daweyn ilko oo bilaash ah	Marka aad uur yeelatid iyo ilaa sannad marka aad umushid	Weydii dhakhtarkaaga ilkaha
Dawooyin bilaash ah	Mudo ah sannad ka dib umusha	Weydii GP
Council Tax	Dhamaanteed oo lagaa bixiyo ama	Xafiisyada golaha (council)

Other Refugee Council publications are available at www.refugeecouncil.org.uk

Page 3 of 31

Registered charity no. 1014576 Registered company no. 2727514 Registered address: 240-250 Ferndale Road London SW9 8BB

Benefit	qayb aad ku bixisid cashuurta degmada (Council Tax payments)	degmadaada
Housing Benefit (Gargaar Guri)	Dhamaan ama qayb lagaa bixiyo kharashka guriga	Xafiisyada golaha degmadaada
Working Tax Credit (Cashuur Dhaafidda Dadka Shaqeeya)	Si lagaaga gargaaro inaad iska bixisid kirada haddii dhakhligaagu hooseeyo	www.inlandrevenue.gov.uk tel:0845-300 3900 (8 subaxnimo – 8 fiidnimo, Isniin - Jimce)
Child Tax Credit (Cashuur Dhaafidda Ilmaha)	Waxa la bixiyaa iyada oo lagu biirinayo gargaarka ilmaha (Child Benefit)	www.inlandrevenue.gov.uk Tel:0845-300 3900 (8 subaxnimo – 8 fiidnimo, Isniin - Jimce)
Child Trust Fund (Sanduuqa Kaydka Ilmaha)	Waa xisaab kayd iyo maalgalin oo cusub oo loogu talagalay caruurta. Ilmaha dhashay 1-dii Bishii Sagaalaad 2002 ama ka dib waxa la siin doonaa foobar ah £250 si loo bilaabo xisaabtooda.	Tel: 0845-3021470 (8 subxnino – 8 fiidnimo) www.childtrustfund.gov.uk
Child Benefit (Gargaarka Ilmaha)	Waa gargaar la siiyo dadka korinaya caruur. Kuma xidhna inta lacag ku soo gasha ama wixii aad kayd lacag ah haysatid	www.inlandrevenue.gov.uk/ childbenefit Tel: 0845-3021444 (8 subaxnimo – 8 fiidnimo, Isniin - Jimce)
Income Support (Taagerada Dakhliga)	Waxa loogu talagalay waalidka kali ah ee shaqeeya wax ka yar 16 saacadood todobaadkii.	Xafiiska Gargaark ee Degmadaada (Benefits Agency)
Statutory Paternity Pay (Mushaharka Aabanimada ee Sharciga ah)	Shaqo-bixiyeyaasha ayaa bixiya todobaad walba (mudo ah 2 todobaad) inta lagu jiro fasaxa mushaharka leh ee aabanimada (weydiiso ugu yaraan 28 maalmood ka hor maalinta ay tahay inaad qaadatid fasaxa aabanimada)	
Gargarka Caafimaadka		Weydii Dhakhtarkaaga Guud (GP)
Cold Weather payments (Lacagta Wakhtiga Qabowga)	Waxa loogu talagalay in lagaaga gargaaro kharashka kuleylinta inta lagu jiro xilliga aad u qabow	Hay'adda Gargarka ee Degmada / Hay'adda Social Security
Social Fund Loan (Daynkta Sanduuqa Bulshada)	Waa dayn aan dulsaar lahayn oo loogu talagalay dadka baahan	Hay'adda Gargarka ee Degmada / Ha'yadda Social Security
Muraayadaha indhaha oo bilaash ah,		Weydii Dhakhtarkaaga Guud (GP)

caano iyo fiitaamiin bilaash ah iyo gargaar ah kharashka safarka ee cisbitaalka		
---	--	--

Xuquuqda Umusha

	<p>Xuquuqda umusha ee haweenka shaqeeya</p> <p>Marka aad tahay hooyo ama aad hooyo dhawaan noqon doontid isla markaana shaqeysid waxa aad leedahay xuquuq go'an oo uu ilaaliyo sharcigu. Tusaale ahaan, waxa aad xaq u leedahay fasaxa umusha, mushaharka oo lagu siiyo saacadaha aad ku maqan tahay baadhitaanada ka horeeya umusha, waxa kale oo aad xaq u leedahay inaad shaqada ku soo noqotid gudaha wakhti go'an.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Marka aad og tahay inaad uur leedahay waxa aad la xidhiidhi kartaa hay'adaha hoose si aad talo u heshid. Xafiiskaaga shaqaalaha ayaa sidoo kale awoodi kara inuu kaala taliyo wixii ah foomam/waraaqo aad u baahan tahay inaad buuxisid iyo goorta la rabo. o Waxa lagugula talinayaa inaad u sheegtid horjoogahaaga ama qofka madax kuu ah inaad uur leedahay si qofkaasi u sameyn karo wixii ah isbeddelo lagama-maarmaan ah ee lagu sameynayo waajibaadkaaga sababo amaan daraadood.
Gargaar	<p>Direct.gov The Maternity Alliance</p> <p>The Department of Trade and Industry National Association of Citizens Advice Bureaux (NACAB) Department for Work and Pensions</p> <p><i>Ururkaaga shaqaalaha</i></p> <p><i>ACAS</i></p>

Dhaqaalaha iyo Daynta

	<p>Dhaqaalaha iyo Daynta</p> <p>Korinta ilmuhu way kharash badan tahay, waxana ay sii kharash badan tahay haddii dakhligaagu hooseeyo ama aad tahay waalid kali ah.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o U hubso inaad weydiisatid wixii ah gargaar (benefits) ee kuu banaan (eeg qaybta Gargaarka) o Dhibaatooyinka dayntu way sii weynaadaan haddii aan wax laga qaban, sidaa daraadeed raadso gargaar haddii aad u baahan tahay. o Hay'adaha hoose ayaa ku siin kara la-talin dhaqaale.
Gargaar	<p>National Debtline IFA Promotions</p>

Waajibaadka iyo Daryeelka Ilmaha

	Diiwaangalinta Dhalashada Ilmahaaga
--	--

Other Refugee Council publications are available at www.refugeecouncil.org.uk

Registered charity no. 1014576 Registered company no. 2727514 Registered address: 240-250 Ferndale Road London SW9 8BB

	Waa in dhalashada ilmaha lagu diiwaangaliyo gudaha lix todobaad laga bilaabo taariikhda dhalashada iyada oo laga diiwaangalinayo xafiiska Diiwaangalinta (Registry office) ee ugu dhow. Waxa aad ka heli kartaa adreeska/cinwaanka buugga teleefonka adiga oo ka eegaya hoosta magaca maamulkaaga degmada (local authority).
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Marka aad diiwaangilinaysid dhalashada ilmahaaga, waxa lagu siin doonaa hal cadeyn dhalasho oo bilaash ah (waxa aad iibsan kartaa koobiyo haddii aad rabtid). o Waxa kale oo lagu siin doonaa foom aad u geysid Dhakhtarka Guud (GP). o Wac xafiiska Diiwaangalinta ee degmadaada si aad u weydiisid hababka loo diiwaangaliyo ilmahaaga.
Gargaar	Cisbitaalka / umulisadaada / booqdahaaga caafimaadka (health visitor)

	<p>Ilmahaaga oo Aad Kaligii ka Tagtid</p> <p>In kaligii laga tago ilmo aan taa diyaar u ahayn waxay ku noqon kartaa waayo cabsi leh. Waxa beelaha qaarkood suurogal ka noqon kara in aad ilmahaaga kaligood ka tagtid oo aad filatid in dad kale kuu sii ilaaliyaan, laakiin marka la joogo magaaloyinka waaweyn waa in aan sidaa loo fikirin oo aan taa lagu talogalin.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Marna kaliga ilmo yar ha tagin. o Waxa dhaqan fiican ah in aan ilmo ka yar 13 kaligii guriga lagaga tagin (sida uu ku taliyay NSPCC). o Haddii aad leedahay ilmo da' roon oo ku faraxsan in kaligood laga tago, u hubso inay yaqaan sida ay kuula soo xidhiidhi layaahay haddii ay wax u baahan yihiin ama waxa ay sameyn lahaayeen marka ay jiraan arrimo degdeg ahi (tusaale ahaan, marka uu dab dhaco).
Gargaar	NSPCC

	<p>Daryeelka Sii-haynta Ilmaha</p> <p>Haddii aad u baahan tahay in ilmaha lagu sii hayo waxa aad dooran kartaa goob sii-hayn ilmo (nursery), ilmo-ilaaliye (childminder), adeegto ilmo (nanny) ama qaraabo ku caawiya.</p> <ul style="list-style-type: none"> o <u>Goob sii-hayn ilmo oo maalintii ah (Day nursery)</u>: Waxa kuwaa loogu talogalay ilmaha aan gaadhin da'da dugsiga (qaarkood waxay hayaan ilmaha ah ilaa da'da 3 jir, qaarkoodna ilaa da'da 5 jir). Waxay ka diiwaansan yihiin oo kormeera Ofsted si loo hubiyo inay bixiyaan adeeg fiican. o <u>Kooxaha Ciyaaraha</u>: Waxa kuwaa maamula kooxo ah waalid, oo badanaa ay weheliyaan laba shaqaale oo mushahar leh. Badanaa waxay bixiyaan xiisado ah ilaa 4 saacadood oo loogu talogalay ilmaha u dhexeeya da'da 3 iyo 5. o <u>Ilmo-ilaaliye</u>: Ilmo-ilaaliyeyashu waxay helaan tababar waxana caadi ahaan ay u shaqeystaan iskood. Sida goobaha sii-haynta ilmaha ee maalinta ah waxay ka diiwaansan yihiin Ofsted waxana la kormeeraa hal mar sannadkii. Waxay ilmahaaga ku hayn doonaa gurigooda. Kala heshii waxa laga yeeli lahaa mushaharka maalmaha fasaxa iyo waxa dhici doona haddii aad joojisid shaqadooda dhawr maalmood haddii ilmahaagu jirado. o <u>Ilmo Sii-hayeyaal (Babysitters)</u>: Ilmo sii-hayeyaasha lagama rabo inay leeyihiin wax shahaadooyin ama cadaymo ah si ay u sii hayaan
--	---

	<p>ilmaha. Taa macnaheedu waxa weeye qof kasta ayaa isku xayaysiin kara inuu yahay ilmo sii-haye. Waxa lagu taliyay in da'da ugu hooseysa ee ilmo sii-hayuhu noqdo 16, sababta oo ah ilmo ka weyn da'da 16 waxa uu fikrad roon ka haysta waxa suurogal ahaan khatar u ah caruurta yaryar (haddii aad isticmaashid ilmo sii-haye intaa ka da' yar, waxay u badan tahay in adigu aad mas'uul ka noqotid wixii khalad dhaca). Haddii aad dooranaysid ilmo sii-haye, waxa fikrad fiican ah inaad ka heshid ugu yaraan 2 tixraac.</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ <u>Qaraabada</u>: Waxa laga yaabaa in qof qaraabo ah uu raali ka yahay inuu u jjabnaado xagga saacadaha uu shaqeeyo iwm. Waxa kale oo meesha ku jirta faa'iidada ah in qofka qaraabada ah iyo ilmuhu is yaqaanaan. Waxase wali la rabaa inaad ka heshiisaan sida ilmahaaga loo sii hayn doono.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ Eeg kala-doorashada la heli karo ka hor intaanad heshiis galin. ○ U hubso in qof kasta oo sii ilaalinaya ilmahaaga uu yaqaano sida laguula soo xidhiidho marka wax degdeg ahi yimaadaan. ○ Waxa fikrad fiican ah inaad u fiirsatid ilmahaaga oo la jooga cidda sii haynaysa si aad u ogaatid inay fahmayaan. Marka ay tahay goobaha sii-haynta ilmaha u hubso inaad ku qanacsan tahay goobta, firfircoonida ay bixiyaan iyo shaqaalaha. ○ U hubso inaad u cadeysid filashadaada cidda sii haynaysa ilmahaaga (ka hadal arrimaha edebta ama baahida cunto ee ilmahaaga)
Gargaar	<p>Social Services Day Care Trust Childcare Link Ofsted complaint line</p>

	<p>Dulmiga Ilmaha Dulmiga ilmaha waxa ku jira xumeynta ah qaabab dhileysi ilmo iyo sawirada cawrada ah ee ilmaha (oo ay ku jirto Internetku).</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ Haddii ilmahaagu isticmaalo internetka, wada jir ahaan ugu heshiia xeerar amaan. U hubso in ilmahaagu yaqaano in aanu bixinin wax ah faahfaahin shakhsi sida lambarka teleefonka ama adreska marka ay isticmaalayaan qolalka sheekaysiga internetka (chatroom). ○ La soco wixii ah isbeddelo ah niyadda ama dabeecadda ilmahaaga, ama calaamada kale ee digniinta ah sida hawl galmo oo aan haboonayn, sariirta oo uu qooyo, dhibaatooyin dugsi, waxyeelaynta naftiisa, dhaqan galmo oo aan haboonayn. ○ Waxa aad ilmahaaga uga digi karta falalka aan caadiga ahayn ee xumeeyayaasha waxana aad weydiin kartaa inay kuu sheegaan wixii ah walwal ka qabaan.
Gargaar	<p>NSPCC Parentline Plus</p>

	<p>Badbaadinta Ilmaha (Ma ka walwalsan tahay ilmo?) Xumeynta ilmaha waxa ku jira kara dhaawac ah jidhka, dayacaad, xumeyn ah galmo ama niyadda.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ U hubso inaad taqaanid waxa noqonaya xumeyn, tusaale ahaan: dhirbaaxidda ilmaha wakhtigan si weyn ayaa looga dayriyay, waxana garaacista ilmaha laga soo qaadaa inay tahay xumeyn jidhka ah. ○ Haddii aad ka walwalsan tahay sida adiga ama qof kale ula dhaqmo ilmo, la-talin ka raadso adeeg taageero oo la heli karo.

	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii aad ka walwalsan tahay ilmo oo aanad hubin wixii aad sameyn lahayd, waxa aad la hadli kartaa NSPCC oo bixiya khad gargaar oo qarsoodi ah. Haddii aad dhibaato ku wargalidsid Social Services ama Boliiska waxa lagu weydiin doonaa faahfaahin kugu saabsan iyo war ku saabsan walwalkaaga.
Gargaar	Family Rights Group NSPCC Anti-Bullying Campaign

	<p>Amaanka</p> <p>Shilalka intooda badani waxay ka dhacaan guriga, sidaa daraadeed waxa muhiim ah inaad gurigaa ka dhigtid mid "amaan u ah ilmaha".</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o U hubso inaad taqaanid wixii aad sameyn lahayd haddii shil dhaco. U hubso inaad haysatid alaabta gargaarka aasaasiga ah. o Marna ilmahaaga kaligii ha kaga tagin maydhashada ama qubeyska, xiitaa mudo aad u gaaban oo aad ka jawaabaysid teleefonka. o Dhig busteyaal iyo go'yaal xoolka ilmahaaga, ha dhigin barkimooyin iyo duf jilicsan. o Sigaar ha ku ag cabin ilmahaaga. o Si gaar ah uga taxadir inaad kildhiyada, kaawiyadaha iyo cabitaanada kulul ka fogeysid tiigsiga ilmaha si ay gubasho uga badbaadaan. o Si joogto ah u hubi baytariyada qalabkaaga digniinta qiiqa. o U hubso in alaabta caruur-ciyaarsiisku ay ku haboon yihiin da'da ilmahaaga oo aanay u lahayn halis ah margasho ka imanaysa liqidda qaybo yaryar.
Gargaar	<p><i>Booqdeyaasha Caafimaadka (Health Visitors)</i></p> <p>Royal Society for the Prevention of Accidents (ROSPA) Child Accident Prevention Trust</p>

Waxbarasho

	<p>Dugsi-dhigasho</p> <p>Caruurta aan afkooda koobaad ahayn Ingiriisi ama laga yaabo inay gafeen dhawr sannadood oo ah waxbarasho waxa laga yaabaa inay ku adkaato inay manhajka la qabsadaan marka ay dugsiga ka dhigtaan Boqortooyada Midowday (UK). Dugsi kastaa waxa uu leeyahay siyaasad uu ku shaqeeyo oo la hirgaliyo si loo sugo in ilmaha gargaar u baahan la siiyo gargaar dheeraad ah.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Ilmahaaga 3 iyo 4 sanno jirka ah waxay xaq u leeyihiin boos waxbarasho goor hore ah oo bilaash ah oo ah ilaa 6 xilli ka hor inta aanay bilaabin dugsiga oo toos ugu xigta sannad-dhalashada shanaad ee ilmahaaga. Sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah magaca ilmahaaga gee goob sii-hayn ilmo (nursery), sababta oo ah dhib bay noqon kartaa sida boos lagu helo. Weydii golaha degmadaada (council) war ku saabsan goobaha sii-haynta ilmaha ee degmadaada. o Waxa lagugula talinayaa inaad codsatid boos dugsi marka ilmahaagu jiro 2 sannadood sababta oo ah tartanka loo galayo boosaska ayaa dugsiyada intooda badan ka noqon kara mid xoogan. o Waa in dugsigaagu awoodo inuu kaa gargaaro su'aalaha aad ka qabi

	kartid wax kasta oo uu ku jiro taageero af oo la siiyo ilmahaaga ilaa walwalka ku saabsan cabsi-galinta.
Gargaar	Department for Education and Skills

	Cabsi-galin Cabsi-galintu waxay ilmo kasta ku dhici kartaa wakhti kasta. Waxay noqon kartaa cayn ama dhaawac jidhka ah. Haddii ilmahaagu soo sheego in la cabsi-galiyay ama la baaday, waa inaad awoodid inaad taageero ka heshid dugsigaaga.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Calaamadaha cabsi-galinta waxa ku jira kara ilmahaaga oo aan doonaynin inuu tago dugsiga ama isbeddel ku dhaca dabeecadda ilmahaaga. o Sababta oo ah cabsi-galintu ama baaddu waxay badanaa ka dhacdaa dugsiga, dhamaan dugsiyadu waxay leeyihiin Siyaad Ka-hortagid Cabsi-galin (Anti-Bullying Policy) oo sheegaysa sida ay wax uga qabtaan oo ay isugu dayaan inay joojiyaan cabsi-galin dhacda. Haddii aad walwal ka qabtid amaanka ilmahaaga marka uu dugsiga joogo, u hubso inaad kala hadashid dugsiga si ay u qaadi karaan talaabada haboon. o Waxa laga yaabaa in ilmaha caruurta kale cabsi galiya uu isaga naftiisu u baahan yahay gargaar. Haddii la soo sheegay cabsi-galin, waa in ilmaha naftiisa la siiyo taageero si uu u fahmo oo uu u xakameeyo dabeecaddiisa.
Gargaar	Kidscape Anti-Bullying Campaign Ololaha ka Hortaga Baada Education Welfare Services

Caafimaadka

	Maandooriyeyaasha Lagu Wafu Waxa si soo kordhaysa u soo badanaya isticmaalka maandooriyaha ama daroogada ay isicmaalaan caruurta iyo dadka da'da yar. Saameynta suurogalka ah ee ka iman karta qaadashada maandooriyeyaasha qaarkood waa arrin leh naxdin weyn, hase yeeshe caruurta intooda badan qaadashada daroogadu waxay u tahay tijaabin mana noqon doonaan kuwo si joogto ah u isticmaali doona. Hase yeeshe, waxa muhiim ah in caruurta looga digo waxyeelada daroogada oo goor hore la siiyo aqoon ay iskaga ilaaliyaan.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Sii caruurtaada aqoon ay iska ilaaliyaan qaadashada daroogada iyo tabaha la iskaga caabiyo siinta daroogada (“dheh kaliya maya”). o Mawduuca oo aan laga hadlin macnaheedu ma aha in ilmahaagu aanuu daroogo kula kulmin dibadda guriga, sidaa daraadeed waxa fiican in laga gargaaro sidii ay u sameyn lahaayeen doorasho warqabid leh.
Gargaar	Talk to Frank National Drugs Helpline Community Drug Education Project Narcotics Anonymous

	Khamri
--	---------------

	Khamrigu waa maandooriye ama daroogo sharci ka ah wadankan, laakiin waa sharci-daro in laga iibiyo qof da'diisu ka yar tahay 18 sannadood ama in qof ka yar 18 jir uu khamri ka iibsado goob lagu cabo khamriga (pub).
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ Haddii aad doonaysid talo ku saabsan wixii aad ilmahaaga uga sheegi lahayd khamriga, Talk to Frank ayaa haya tiro ah buugaag yaryar oo faa'iido leh oo bilaash ah. ○ GP-ga ayaa kuu sii gudbin kara hay'adaha la-talinta daroogada ama khamriga ee degmada.
Gargaar	Alcohol Concern Drinkline Alcoholics Anonymous (AA) Al-Anon Family Talk to Frank

	Ambalaas / 999 Ambalaas ku-qaadidda ilaa cisbitaalka waa bilaash marka ay jiraan xaalado degdeg caafimaad.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ Haddii xaaladdu aad u culus tahay wac 999. ○ Ambalaas aad u timaadid cisbitaal macnaheedu ma aha in si dhakhso ah laguugu daweyn doono A&E, sababta oo ah xaaladaha waxa wax looga qabtaa sida ay u kala culus yihiin. ○ Haddii aad wacdid 999, diyaar u noqo inaad sheegtid adreeskaaga oo aad sharaxdid xaaladda qofka dhawaacan / jiran. ○ Kharash ayaa lagugu soo dilici karaa haddii aad ambalaas ugu wacatid xaalad aan degdeg u baahnayn.
Gargaar	Ambalaas Wac: 999

	<h2>Dhakhtarka Ilkaha</h2>
	Caruurta waxay xaq u leeyihiin daweyn ilko oo bilaash ah ilaa da'da 16. Waxa lagu sameyn karaa baadhitaan ilko oo bilaash ah mudada uurka iyo ilaa sannad ka dib dhalashada ilmahaaga.
Talooyin	○
Gargaar	Adeegga Ilkaha ee degdegga saacadaha ka baxsan wakhtiga shaqada

	<p>Qorsheynta Qoyska iyo Caafimaadka Galmada</p> <p>Adeegyada qorsheynta qoyska intooda badani waxay bixiyaan tiro adeegyo ah sida lidka-uurka oo bilaash ah iyo talo ku saabsan ka-hortagga uurka iyo sida wax looga qabto uurka aan la rabin. Kiliinigyada Caafimaadka Xubnaha Taranka iyo Marinka Kaadida (Genito Urinary Medicine) (GUM) (oo marmarka qaarkood loo yaqaano kiliinigyada “STD”) ayaa laga heli karaa cisbitaalada waaweyn oo bixin kara talo ku saabsan arrimaha caafimaadka galmada iyo daweynta cudurada galmada la isugu tabiyo.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Xusuuso in adeegyadaasi si buuxda qarsoodi u yihiin. Hase yeeshee, waxa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad marka ugu horeysaba u cadeysid in aanad doonaynin in Dhakhtarkaaga Guud (GP) lagu wargaliyo natiijooyinka baadhitaanka.
Gargaar	<p>Family Planning Association Marie Stopes Clinic Kiliinigyo ah Caafimaadka Xubnaha Taranka iyo Marinka Kaadida (Genito Urinary Medicine) oo ka jira cisbitaalada waaweyn</p>

	<p>Goynta Cawrada Hablaha</p> <p>Goynta Cawrada Hablaha (Gudniinka) waxa ku jira goynta dhamaan ama qayb ka mid ah cawrada haweenka waxana ay leedahay halis caafimaad oo weyn. Waxa gudaha Boqortooyada Midoweda (UK) laga dhigay dambi sannadkii 1985. Waxa kale oo wakhtigan marka la eego Xeerka Goynta Cawrada Hablaha (Female Genital Mutilation Bill) (2003) dambi ah in waalidku iyo qaraabadu hablaha dibadda uga saaraan Boqortooyada Midowday si loogu soo sameeyo Goynta Cawrada Hablaha, xiitaa haddii la geeyo wadamo ay sharci ka tahay. Waalidka oggaalada in inantooda lagu sameeyo Goynta Cawrada Hablaha waxa lagu xukumi doonaa xadhig ama xabsi ah 10 ilaa 14 sannadood.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii aad tahay haweenay lagu sameeyay goynta cawrada, waxa wali muhiim ah in aad raadsatid daryeelka ka horeeya umusha. Dhakhtarkaaga, umulisadaada iyo booqdaha caafimaadka waxa dhamaantood loo tababaray inay daryeelka ugu fiican ku siiyaan inta aad uurka leedahay iyo wakhtiga umusha. o Xusuuso, waxa aad xaq u leedahay inaad iska diiwaangalisid Dhakhtar Guud (GP) oo haween ah.
Gargaar	<p>Black Women Health & Family Support Forward</p>

	<p>Dhakhtarka Guud (GP) iyo Adeegyada Umusha</p> <p>Gudaha Boqortooyada Midowday (UK) waxa ka jira la-talin iyo daweyn bilaash ah oo uu bixiyo Adeegga Qaranka ee Caafimaadka (National Health Service) (NHS). Dhakhaatiirta Qoyska (GPs) ayaa guud ahaan ah barta ugu horeysa ee lagula kulmo habka caafimaadka Boqortooyada Midowday. Dhakhaatiirka Guud (GPs) waxay awoodi doonaan inay bixiyaan la-talin ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo noloshu caafimaadka leh, ay qoraan dawooyin, ay kaala taliyaan oo ku siiyaan talaalo, isla markaana waxay kuu sii gudbin karaan takhasusle haddii loo baahdo.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii aanad lahayn Dhakhtar Guud (GP), mid iska diiwaangali sida ugu dhakhsaha badan marka aad ogaatid inaad uur leedahay. Haddii

	<p>aanad mid helin, ama Dhakhtarka Guud (GP) ee xaafadaada aan meeli ka banaanayn, la xidhiidh Maamulka Caafimaadka Degmada (Local Health Authority) si aad gargaar u heshid.</p> <ul style="list-style-type: none"> ○ Xusuuso in aad xaq u leedahay inaad iska diiwaangalisid dhakhtar haween ah. ○ Dhakhtarkaaga Guud (GP) waxa uu kaala hadli doonaa ikhtiyaarka daryeelka ka horeeya umusha iyo ikhtiyaarka umulinta. Waxa uu Dhakhtarkaaga Guud (GP) ka jawaabi doonaa su'aalahaaga ku saabsan umusha waxana uu ku siin doona warka umulisoooyinka degmada. ○ Dhakhtarkaaga Guud (GP) ama umulisadaada (hadba ka ka mas'uul ah daryeelkaaga) ayaa kuu sharixi doonaa wixii ah baadhitaano ay sameyn doonaan (sida baadhitaano dhiig.) ○ Umulisadaada ayaa kula socon doonta ilaa 21 maalmood ka dib umusha, ka dib waxa daryeelka lagu wareejiyaa booqdaha caafimaadka (health visitor). ○ Booqdahaaga caafimaadku waxa uu kaala talin doonaa nafaqeynta ilmaha, nafaqada ku haboon adiga iyo ilmaha, farsamooyinka waalid ahaanta, kooxaha ilmaha yar iyo ilmaha socod-baradka ah iyo talaalada. Waxa lagugu martiqaadi doonaa inaad si joogto ah u aragtid booqdahaaga caafimaadka si loo hubiyo koriinka ilmahaaga ilaa da'da dugsiiga hoose. ○ Xusuuso waxa aad xaq u leedahay adeegyada qaarkood oo bilaash ah sida daweyn ilko oo bilaash ah (daryeelk ilko oo ah NHS haddii aad uur leedahay ama aad dhawaan umushay (ilaa sannad). Weydii Dhakhtarkaaga Guud (GP) ama umulisada warka wixii aad xaq u leedahay. ○ Haddii aanad ballantaada iman karin, fadlan soo wac oo jooji ballanta si qof kale u isticmaalo.
Gargaar	<p>NHS direct Khad gargaar oo lagu helo dhakhtar</p>

	<p>HIV+ iyo AYDHIS HIV iyo cudurada kale ee galmada la isugu tabiyo waxay ku soo kordhayaan wadankan waxana qaadi kara qof kasta oo yeesha galmo aan dhawrsanayn. Waxa kale oo HIV laga qaadi karaa dheecaanada jidhka oo la kala beddesho marka la wadaago irbad wasakheysan wakhtiga la isticmaalayo daroogo.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> ○ Haweenay kasta oo ilmo uurka ku sida waxa loo bandhigaa in laga qaado baadhitaan HIV inta ay uurka leedahay si halista cudur gaadha ilmaha (mudada foosha, naas-nuujinta) loo yareeyo. ○ Haddii aad qabtid HIV (oo aanad lahayn calaamado) waxa wali muhiim ah inaad sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah u raadsatid talo caafimaad. ○ Waxa jira tiro ah taageero balaadhan oo loogu talagalay dadka qaba HIV ama qaba AYDHIS. ○ Haddii aad ka walwalsan tahay xaaladdaada HIV, waxa aad heli kartaa baadhitaan dhiig oo bilaash ah. ○ Kiliinigyada Caafimaadka Xubnaha Taranka iyo Marinka Kaadida (Genito Urinary Medicine) (GUM) (oo marmarka qaarkood loo yaqaano kiliinigyada "STD") ayaa laga heli karaa cisbitaalada waaweyn oo bixin kara talo ku saabsan arrimaha caafimaadka

	galmada oo uu ku jiro baadhitaanka fayraska HIV.
Gargaar	Kiliinigyo Caafimaadka Xubnaha Taranka iyo Marinka Kaadida (Genito Urinary Medicine) o ka jira cisbitaalada waaweyn National AIDS Helpline Positively Women International Community of Women Living with HIV/AIDS

	Caafimaadka Maskaxda Marka la tixraaco MIND “Afartii qof mid baa yeelan doona dhibaato caafimaad oo maskaxda ah mar ka mid ah noloshiisa.” Sidaa daraadeed waa arrin ka caamsan ama ka tiro badan inta dadka badidoodu u haystaan.
Talooyin	Waxa dhibaato weyn kugu noqon kara haddii adiga ama qof kuu dhow uu qabo dhibaato caafimaad oo maskaxda ah. Waxa la-talin iyo gargaar laga heli karaa Dhakhtarkaaga Guud (GP), laakiin waxa jira tiro ah hay’ado qaran ama degmo oo ku takhasusay baahida caafimaadka maskaxda.
Gargaar	MIND (National Association for Mental Health) Saneline The Samaritans Medical Foundation for the Care of Victims of Torture Refugee Support Centre Rethink

	Caafimaadka Maskaxda: Diiqadda Ka-dib Umusha Dareen khafiif ah oo diiqad ama murugo ah ma aha wax aan caadi ahayn dhawr maalmood ka dib umusha. Haween badan ayaa waxa ku dhici doona waxa loo yaqaano marmarka qaarkood “murugada ilmaha dhashay” – taasoo macnaheedu yahay niyad hooseysa iyo oohin ilaa todobaad ama in ku dhow ka dib umusha. Haddii aan taasi ku dagin gudaha laba todobaad, waxay taasi calaamad u tahay diiqadda ka-dib umusha. Haddii niyaddaadu hooseyso mudo intaa ka dheer oo aad ka walwalsan tahay inaad qabtid diiqadda ka-dib umusha, la hadal Dhakhtarkaaga Guud (GP). Tobankii haween mid baa yeelan doonta xoogaa ah diiqadda ka-dib umusha in mudo ah, laakiin haweenka intooda badani waxa ka soo kaban karaan haddii la taageero.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii hore diiqadi kuugu dhacday, waxa lagugula talinayaa inaad kala hadashid Dhakhtarkaaga Guud (GP) ka hor umusha. o Arrimaha gargaar ka geysan kara ka-hortagga diiqadda ka-dib umusha waxa ka mid ah wehel taageero iyo gargaar leh, iyo qoys iyo saaxiibo faham leh, sidaa daraadeed u hubso inaad oggalaatid wixii gargaar lagu soo bandhigo!
Gargaar	The Association for Post Natal Illness (APNI)

	Dhicinta Uur ku joogsada lixda bilood ee ugu horeysa waxa la yidhaahdaa dhicin. Dhicintu aad bay caam u tahay saddexda bilood ee ugu horeeya uurka (lixdii uur ilaa mid ayaa ku dambeeya dhicin).
	<ul style="list-style-type: none"> o Xusuuso, adigu dambi ma lihid, haddii ay kugu dhacdo dhicin. Haweenaydu waxba kama qaban karto dhicinta.

Talooyin	Dhacin kugu dhacda (gaar ahaan xilliyada dambe ee uurka) waxa ay noqon kartaa waayo aad xanuun u leh waxana caadi ah in taageero looga baahdo qoyska, saaxiibada iyo xirfadleyda. Dhakhtarkaaga Guud (GP) ayaa kaala talin kara illaha laga helo taageero.
Gargaar	Miscarriage Association

	Farmasiiyada Wax ballan ah looma baahna in la arko farmasiile. Farmasiilaha xaafaddaadu waxa uu aqoon u leeyahay inuu kaala taliyo dawada kuugu fiican, oo kugula taliyo daweynta ciladaha fudud iyo inaad u baahan tahay inaad aragtid Dhakhtarkaaga Guud (GP). Farmasiiyada qaarkood waxay ku dhex yaalaan dukaanada waaweyn.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Farmasiiyada intooda badani waxay haweenka ka weyn da'da 18 siin karaan dawada lidka-uurka marka degdeg jiro iyaga oo aan u baahan inay ku weydiiyaan faahfaahin shakhsi.
Gargaar	Waxa aad la hadli kartaa farmasiile jooga farmasiga xaafaddaada ama dukaanada waaweyn.

	Uurka Dhalidda Ilmaha Waxa jira tiro ah ikhtiyaar ama doorasho aad heli kartid oo ku saabsan dhalidda ilmaha. Waxa laga yaabaa in lagugu dhiirigaliyo inaad ku dhashid cisbitaalka, gaar ahaan haddii ay tahay markii kuugu horeysay, ama haddii umul adagi hore kuu soo martay, laakiin waxa la soo jeclaanayaa guri lagu dhalo. Waxa kale oo aad rabi kartaa in lagu siiyo faahfaahin ku saabsan hababka dhalidda, oo ay ku jirto doorashada dawooyinka xanuunka lagaga nafiso.
Talooyin	Waxa aad talo guud oo ku saabsan waalidnimada ka heli kartaa booqdaha caafimaadka ama xarunta Dhakhtarkaaga Guud (GP). Umulisadaada ayaa kugu wargalinta doonta warka fasalada ka horeeya umusha ee loogu talagalay haweenka uurka leh. Umulisadaada ama NCT ayaa kaala hadli kara doorashada dhalista.
Gargaar	National Childbirth Trust (NCT) Umulisadaada

	Sigaar-cabista Haddii aad sigaar cabtid, waxa aad u muhiim ah inaad isku daydid inaad cabista sigaarka u joojisid sida ugu dhakhsaha badan marka aad ogaatid inaad uur leedahay. Taasi waxay u fiican tahay caafimaadkaaga iyo ka ilmahaaga. Sigaar-cabistu waxay keeni kartaa cuduro dilaa ah. Sigaar-cabista soo-gaadhista ah ama dadban, oo ka timaado qiiqa sigaarka oo ku soo gaadho sababta oo ah qof kale oo kugu ag cabaya sigaar, ayaa sidoo kale waxyeelo u geysan kartaa caruurta iyo dadka kale ee waaweyn. Waxa la heli karaa taageero kaa gargaari karta joojinta sigaarka.
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Waxa wakhtigan jira gargaar badan, sida dhajis iyo xanjo, kaa gargaari kara joojinta sigaar-cabista (waxa laga heli karaa farmasigaaga, ama marmarka qaarkood dukaanada waaweyn). Qaarkood bilaash ayaa lagu heli karaa haddii la hayso warqad dhakhtar. o Waxa laga yaabaa inaad faa'iido ka heshid koox taageero oo aad ku biirtid.

Gargaar	NHS Smoking helpline NHS pregnancy smoking helpline NHS Asian Tobacco Helpline
----------------	--

	<p>Uurka Tobaneeyo-jirka iyo Caafimaadka Galmada</p> <p>Caruurta wax bay ka maqli doonaan galmada haddii waalidkoodu kala hadlaan iyo haddii kaleba. Dugsiyadu waxay caadi ahaan bixiyaan barnaamij gaaban oo ah “waxbarashada galmada” si ardaydu wax uga bartaan galmada (iyo xidhiidhka dadka) iyada oo la joogo goob la xukumo. Waxa kale oo waalidku door ka ciyaari karaan in la hubiyo in caruurta helaan xaqiiqada oo aanay helin kaliya khuraafaadka ku wareegaya dhulka ciyaaraha ee dugsiga.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Waalidku waxay caruurta war ka siin karaan halista ka timaada galmada la yeesho ee aan dhawrsanayn (uur iyo cudurada la isugu tabiyo galmada). U hubso in ilmahaagu yaqaano sida loo sameeyo galmo amaan ah iyo waxa la sameeyo haddii ay yeeshen galmo aan amaan ahayn. o Dugsigaaga ayaa awoodi kara inuu kaala hadlo barnaamijkiisa “waxbarashada galmada”. o U hubso in ilmahaagu uu dareensan yahay inuu kuu iman karo si uu kaala hadlo galmada, si ay kuugu yimaadaan marka ay taageero u baahan yihiin.
Gargaar	Brook Advisory Centres Sex Education Forum Family Planning Association

	<p>Xarumaha Bilaa Ballanta ah (Walk-in) iyo Xarumaha Daweynta Dhaawacyada Fudud</p> <p>Xarumaha bilaa ballanta ah waxa ka shaqeeya kalkaalisoooyin/kalkaaliyeyaal NHS. Waxay bixiyaan daweyn lagu daweyyo cudurada iyo dhaawacyada fudud, waxana ay bixin karaan war ku saabsan Dhakhaatiirta Guud (GP) iyo adeegyada ilkaha ee la heli karo saacadaha aan ahayn kuwa shaqada.</p> <p>Xarumaha daweynta dhaawacyada fudud waxa ka shaqeeya kalkaalisoooyin/kalkaaliyaal degdeg oo khibrad leh oo cilad-sheegid sameyn kara isla markaana daweyn karana noocyo kala duwan oo ah dhaawacyo iyo cilado fudud.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii aanad kala garanaynin inaad tagtid xarun bilaa ballan ah, xarun daweyn dhaawac fudud iyo Qaybta Shilka iyo Degdegga (Accident and Emergency Department) (A&E department) waa inaad wacdid NHS direct. Waxay awoodi karaan inay kaala taliyaan meesha ugu fiican inaad tagtid. o Caadi ahaan waxa ugu fiican in marka hore la waco NHS direct sababta oo ah xarumaha qaarkood ma awoodi karaan inay daweyyaan caruurta yaryar. o Labada nooc xarumoodba caadi ahaan waxay leeyihiin wakhtiyo sugitaan oo ka gaban kuwa qaybaha A&E, kuwaaso u badan inay sixmad yihiin ama laga rabo inay marka hore daweyyaan dhaawacyada iyo xaaladaha sii culus. o Xarumaha bilaa ballanta ah iyo xarumaha daweynta dhaawacyada fudud labaduba waxay awoodi karaan inay bixiyaan dawada lidka-uurka marka uu degdeg jiro.

	o Haddii xaaladdu aad u culus tahay wac 999.
Gargaar	NHS direct

Kooxaha Taageerada

	<p>Khadadka Gargaarka ee Taageerada Niyadda</p> <p>Dad badan ayaa u arka inay gargaar leedahay inay qof dhexdhexaad ah oo aan qoyska lug ku lahayn ay arrimaha haysta kala hadlaan. La-talintu waa ikhtiyaar kuu banaan ama waxa laga yaabaa inaad dooratid inaad wacdid khad gargaar oo qarsoodi leh. Khadadka gargaarku waxay leeyihiin faa'iidada qarsoodinimada haddii aad dooratid.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Xiitaa haddii aanad dareensanayn inay ku haysato dhibaato culus, haddii wax uu walwal kugu hayo, waxa laga yaabaa in markaa aad gargaar ka heli kartid qof aad la hadashid. Haddii aanad doonaynin inaad la hadashid khad gargaar, ma jiraa saaxiib aad si aaminaad leh ula hadli kartid?
Gargaar	The Samaritans Careline

	<p>Budhcadnimada Guriga</p> <p>Budhcadnimada gurigu waa arrin saameyn karta haweenay kasta. Budhcadnimada gurigu kuma koobna farosaar jidhka ah, laakiin waxa ku jira xumeyn niyadda ah, naxariis-daro maskaxda ah iyo bahdilid. (Women's Aid waxay budhcadnimada gurigu u sharaxday inay tahay "budhcadnimo jidh, maskaxeed, galmo ama dhaqaale oo ka dhacda xidhiidh soke ama xidhiidh ah nooc qoys oo leh qaab qasbid iyo dabeecad xukumid")</p> <p>Budhcadnimada gurigu waa wax aan loo baahnayn in haweenaydu u adkaysato. Haddii aad caruur leedahay, waxa korniinkooda aad ugu muhiim ah in aanay arag wax budhcadnimo ah. Waxa jira tiro ah hay'ado oo gargaar siiya haweenka ay haysato budhcadnimo guri, kuwaasoo qaar ka mid ah hoos lagu taxay.</p>
Talooyin	<ul style="list-style-type: none"> o Haddii budhcadnimo guri ay bilaabanto, badanaa way sii socon doontaa waana ay sii xumaan doontaa, waxana ay ku dhamaan kartaa weerar keena geeri. o Waxa laga yaabaa inaad dareentid baxsi la'aan haddii aanad sameysan sheegasho mangangalyo oo aad u madax-banaanayd oo aad ku xidhan tahay ta ninkaaga ama wehelkaaga. Waxa aad xaq u leedahay inaad sameysatid codsi magangalyo oo kuu gaar ah. Haddii aad ka tagtid ninkaaga inta arrintaadu ama kiiskaagu socdo, kaligaa ayaad dib u codsan kartaa. o Xusuuso in ninkaagu aanu sharci ahaan xaq u lahayn inuu galmo kula yeesho haddii aanad raali ka ahayn. o Boliiska wakhtigan uma baahna hadal ay kaa qoraan si ay ninka u qabtaan haddii ay jiraan sababo caqli-gal ah. Waxay si madax-banaan u daba-gali karaan xumeeyeyaasha ama kuwa dulmi sameeya.
Gargaar	Women's Aid Refuge Southall Black Sisters Greater London Domestic Violence Project Muslim Women's Helpline

